



# **Qorshaha qiima siman ee qof kasta leeyahay iyo adiga dhigta Studium**

## Aragtida mustaqbal ee Studium

Aragtida mustaqbal ee dugsigan waxay ay tahay in aan la is midab takoorin ama laga feejognaado xinka, naceybka, hanjabaada iyo waliba kufsiiga.

Waxaan doonaynaa in aan abuurno ama helno dugsi ka madax banaan ama xadidi kara hanaan wwax u fulinta qaldan.

Waxaan dooneynaa in aan abuurno dugsi iyo goob shaqo oo aan lagu kala sareyn ee dadku siman yahay la isuna hayo xushmo iyo xaq dhowr.

Waxaan doonaynaa in uu dugsigan ahaado mid leh aragti wacan ee aan ku saleysneyn fadeexo raadin si aan u badalno fikradaha qaldan ee asalka u ah aasaaska xumaha iyo adeegsiga midab takoorka, silica, iyo sharaf dhaca umadda.

Hab u shaqeynta dugsigan waa mid ku haboon dadkoo dhan nooc kasta oo aad tahay sida: jinsi, qabiil, diin, cid aad aaminsan tahay, jinsi badal, sida: adoo wiil ah hadaad gabar isu, badasho, curyaanimo ama awood darri, hoos u dhigid xaga galmada/gagosha, iyo waliba da'da.

## Sharciga midab kala sooca wuxuu leeyahay

In aan ruuxna loo daryeel xumayn sababa ku saabsan:

- Jinsi
- Jinsi badalasho
- Qabiil ama koox aad ka tirsan tahay
- Diin ama wax kale oo aa daaminsan tahay
- Curyaanimo ama awood darri
- Hoos u dhig galmada/gogosha
- Da'da (gu'gaaga)

## Waa inaadan daeemin cadaadis ruux ku geysto xaga...

**kränkning** = sharaf dhac, xin, naceyb iyo dil ama hadii aad qoraal ku muujiso qoraal wax u dhimaya ruuxa kaaso o bulshada ku baaha, waxca ku filan xita adiga oo mar qudha tiraah waa dambi.

**trakasserier** = dhibid ama silcin adoo ku celcelinaya arin dhibaysa ruuxa walibana tusaya bulshada kale sida ardada fasalka, kuwa dugsiga la dhigta, ama goobta qaxwaha lagu cabo, iyo baraha bulshada jooga si uu uga xanaaqo ama uusan u dareemin farxad.

**sexuella trakasserier** = silcin galmeed inaad tiraah ama aad ku sameyso ruux arin xaga jirkiisa ama galmo si ruuxu u dareemo arin aa ficneyn oo qofka ku beereysa kalsooni darro.

## Sharciga dugsiga ee in dadku siman yahay

- Shaqaale ama arday kuma muujin karo qoraal ama odhaah qof kale in uu ku silicdilo ama midab takooro.
- Qof ka mid ah shaqaalaha ama ardayda kulama dhaqmi karo arinka is ximinta, naceyb, silicdil ama dil ardayda ama dadka oo dhan.
- Kuli waa in la yaqaan sharcigaan laguna dhaqmaa. Macalimiinta iyo ardaydu waa in ay ka hadlaan sharcigan.



## Hadii dhib dhaco

- Sheeg wixi dhacay
- Waxaad la hadli kartaa macalin, lataliye, hagaha waxbarasho, mas'ulka goobta ama xafiiska qaabilaada (expedition) dabaqa 3aad.
- Wadajir baa guul lagu gaaraa, hadii aan si wadajir ah wax u qabano waan sixi karnaa qaladka si uusan dib dambe u dhicin.

## Akhri macluumaad dheeri ah [www.studiumgbg.se](http://www.studiumgbg.se)

- **Ma haysaa aragti ama ra'yi kale?**  
Waxaad la hadli kartaa shaqaalaha skuulka ama ku soo gudbi goobaha waxbarasho halkan [www.studiumgbg.se](http://www.studiumgbg.se) sadarka u hooseeya halka ay ku taalo ra'yi gudbin.
- **Akhri qoraalka oo dhan kuna saabsan sinaanta dadka**  
Waxaa ka heli kartaa dhamaan akhbaaraha [www.studiumgbg.se](http://www.studiumgbg.se)  
Xaga hoose ee akhbaaraha waxbar.



Qeybta hoose



Ku qor qoraalka hoose hortiisa.

Waxan halkan ku cadeynaya inaan ka qeybqaadatay kana raali ahay qoraalkan midab tokoorka iyo in dadku siman yihiin ee lagu soo bandhigay Studium.

---

Qor taariikhda

---

Saxiixaaga

---

Qoraal magacaaga ku saxiix